

## Ilaha

### Legal Aid Ontario

[www.legalaid.on.ca](http://www.legalaid.on.ca) ama wac 1-800-668-8258, Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo wixii macluumaad guud iyo gudbinta qareennada laga yaabo in ay caawin karaan macaamiisha dakhligoodu hooseeyo

### Adeegga U-gudbinta Qareenka ee hay'adda Law Society

<http://lsrs.lsuc.on.ca/lsrs/> ama wac 1-800-268-8326 si laguugu gudbiyo qareennada gaarka ah; 30ka daqiiqo ee ugu horreeya aaya lacag la'aan ah

### Community Legal Education Ontario

[www.cleo.on.ca](http://www.cleo.on.ca), wixii macluumaad ah ee ku saabsan sharciga xeerka qoyska, sharciga socdaalka iyo guud ahaan nidaamka maxkamadda. Waa buugyare ku yaal khadka internetka, *Ilaha Sharciga Qoyska Ontario*, aaya bixisa macluumaad ku saabsan sida loo helo qareen, looga doondoonto macluumaad khadka internetka, oo caawimo looga helo maxkamadaha.

**Arrimaha haysiga iyo marin u  
helka ilmaha ee loogu talagalay  
muhaajiriinta iyo dadka halista  
ugu jira masaafurinta**



Qoraalkaan wuxuu bixinaya macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay dadka dalbanaya qaxootnimada ee ah waalidiinta ayna kala maqan yihiin lammaanahoodii.

## Tusmada

- 1** Xaaladda socdaalka iyo arrimaha ilmo haysiga
- 6** Arrimaha sharci ee lala leeyahay waalidka kale
- 10** Ilaha

# Xaaladda socdaalka iyo arrimaha ilmo haysiga

**Anigu ma ihi muwaadin reer Kanada ah oo ma haysto sharciga Kanada. Weli markaa carruurtayda ma haysan/la wareegi karaa?**

Xaaladdaada socdaalka saamayn kuma laha xuquuqda aad u leedahay haysiga ilmaha iyo marin u helka, awoodda aad ku keensaneyso ilmo haysashada ama marin u helidda, ama awoodda aad uga jawaabeyso dacwo sheegasho.

Ilaa iyo inta uu ilmahaagu ku nool yahay gobolka, maxkamadaha Ontario ayaa dhegeysan kara kiiskaaga oo go'aan ka gaari kara. Taasi waa u dhab qof kasta oo ah:

- Muwaaddin reer Kanada
- deggane rasmi ah
- deggane rasmi ah oo shuruud ku xiran
- qofka aan sharci ku lahayn gudaha Kanada
- qof gudbiyay codsi muhaajirnimo.

**Maxaa dhacaya hadday noqoto inaan ka tago Canada?**

Haddii ay maxkamadda la noqoto in adiga ama waalidka kale aad ka tagtaan Kanada oo tagtaan dal kale, maxkamadaha ayaa tixgelin kara macluumaadkan markay bixinayaamarka ilmo haynta ama marin u siinta. Taasi waa run haddii dalka aad uga baxayso ikhtiyaarkaa ama adiga lagu masaafurinayo.

## **Maria iyo Filip ayaa xiriir gaabn lahaa oo kala tagay waxoogaa ka dib markuu Bobby dhashay.**

Filip ayaa mararka qaarkood booqanayay oo bixinayay kharashyada qaarkood, laakiin Maria ayaa had iyo jeer Bobby daryeelaysay. Maria sharci kuma haysato Kanada oo waxay halis u tahay in dib loogu masaafuriyo dalkeedii hooyo.

Garsooraha ayaa go'aanka sal uga dhigi doona danaha ugu fican ee Bobby. Go'aanka ayaa laga yaabaa inuu noqdo in Maria ay haysato Bobby, haddii u go'aanku noqodo dalkii ay ka timid inay ku noqoto iyo haddii kalbeba.

## **Ma haysto sharci socdaal, laakiin waxaan doonayaa inaan maxkamad qoys u tago arrimo qoys awgood. Miyay tagitaanka maxkamaddu saamayn doonta sharcigeyga?**

Haddii aadan haysan sharciga socdaalka Kanada, billaabidda hawl dacwad qoys waxay halis kuu gelin karta masaafurin.

Markaad tagto maxkamad qoys, habsocodka dacwaddu waxay kaaga baahan tahay inaad dukumentiyada maxkamadda qoyska ku qorto maclummaadka meesha lagaala soo xiriirayo. Taas micnaheedu ayaa ah inay mas'uuliyiinta hay'adda socdaalku ogaan kaaraan meesha aad joogto, oo ay billaabi karayaan hawsha masaafurinta iyaga oo kuu soo diraya waraaq kaaga baahan inaad timaaddo waraysi arrimo socdaal.

## **Muxuu garsooruhu tixgelinaya markuu bixinayo amarka ilmo haysiga ama marin u siinta ilmaha?**

Guud ahaan, maxkamaddu waxay saartaa muhiimad aad u badan ilmaha oo waqtii la jooga labada waalidba. Garsooraha ayaa go'aanka gaari doona iyada oo ku salaysan danaha ugu fican ee carruurta, oo taas micnaheedu yahay in uu tixgelinayo arrimaha ay ka midka yihiin:

- waalidkee sida ugu fican u siin doona ilmaha hoy leh jawi deggan, kalgacayl, iyo amman?
- waa maxay kala doorashooyinka ilmuuh?
- waalidkee sida ugu fican uga soo bixi kara baahida ilmaha?
- ma danaha ugu fican ee ilmahaan inuu ku noolaado waddan kale ama inuu joogo Kanada (haddii ay maxkamaddu aamminsan tahay inuu waalidiinta midkood ilmaha kala baxayo dalka, si ikhtiyaar ah ama ay la gudboonaato masaafurin)?

Garsooraha ayaa laga yaabaa inuu:

- inuu bixiyo amar ku meel gaar ah oo bixinaya shuruudaha ilmo haynta iyo marin u helka inta labada waalid ay joogaan Kanada, isla markaana ay jiri doonaan shuruudo ka duwan haddii midkood waalid ka baxo Kanada.
- uu dareemo inay danta ilmuuh ku jirto inuu hayo hal waalid oo gaar ah, iyada oo aan loo eegin inuu waalidkaasi sii joogi doono dalka ama aanu joogi doonin.
- soo saaro amar diidaya ka saarid, oo sheegaya inaan ilmaha laga kaxayn karin Kanada. Amarkan oo kale ma joojin doonto masaafurintaada. Haddii ay ku soo wajahdo masaafurin, oo laguu xukumo haynta ilmaha oo aad markaa u hesho amar diidaya ka saaridda ilmahaaga, isla markiiba la hadal qareen socdaal.

**Leila iyo Peter  
ayaa laba sano  
ka hor is furay.  
Wiilkooda  
toddobada-  
sano-jira ee Joey  
ayaa toddobaad  
kasta la jooga  
Leila aabbihi  
Peter-na la  
jooga Sabtiyada  
iyo Axadaha  
intooda badan.**

Joey ayaa hadda lagaga daweyaa dhibaatooyin caafimaad oo adag Isbitaal ka carruurta ee deegaanka. Leila ayaa hadda halis ugu jirta in dib loogu masaafuriyo dalkeedii hooyo.

Iyada oo salka ku haysa danaha ugu fican ee ilmaha, waa suurtagal inuu garsooruuhu go'aamin karo inay labada waalidba wada hayaan ilmaha inta ay leila joogto Kanada, laakiin waa in haynta dhabta ah la siiyo Peter haddii leila la masaafuriyo.

## **Aniga ma la i masaafurin karaa ilmahayga la'aantood?**

Haa. Haddii aadan sharci u haysan ilmo haysashada, waa lagu lagu masaafurin karaa ilamhaaga la'aantood.

Haddii aad sharci u haysato ilmo haysashada, maxkamadda aaya kaala shaqeyn doonta inuu ilmahaagu adiga ku raaco markaad ka tagayso dalka, xataa haddii uu jiro amar diidaya ka saaridda ilmahaaga ee waddanka. Hase yeeshe, waxaad u baahan doontaa inaad qaaddo tallaaboooyin firfircooni si aad u xaqiijiso in amarka diidaya ka saaridda ilmahaaga ee waddanka laga noqday. Waa inaad ula hadasho qareen sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

## **Ma ka hortagi karaa masaafurintayda aniga oo kiis keenaya maxkamadda qoyska?**

Maya. Maxkamadaha qoyska Ontario ayaan awood u lalahyn inay joojiyaan amar masaafurin.

Waxaa suurtagal ah in masaafurintaada la daahiyo ilaa amarka ugu dambeeya ee haynta ilmaha la samaynayo:

- haddii aan la samayn amarka ugu dambeeya ee haynta ilmaha
- oo adigu aad wali dood kula jirto garsooraha oo
- adiga iyo waalidka kale uu muran ilmo hayn dhab ah idinka haysto cidda sida ugu fiafn ilmaha u daryeelayasa.

Xataa markaas, waxa dhici karta inaan masaafurintaada la daahin. Maxkamadaha ayaan, guud ahaan, dib u dhigin masaafurinta marka dacwo ilmo hayn loo keeno kaliya sidii la iskugu dayi lahaa in lagaga hortago ama la daahiyo amar masaafurin.

## **Ma jiraan wax aan samayn karo oo aan kaga badbaado masaafurinta si aan ula joogo ilmahaya Kanada?**

Waxa laga yaabaa inaad awooddo inaad la timaaddo codsi socdaal si aad u heshid sharci aad ku sii joogto Kanada, xaaladaha qaarkoodna, aad isku daydo inaad joojiso ama aad daahiso masaafurinta.

Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa inaad awooddid in aad **codsi Bani'aadamnimo iyo Naxariis (Humanitarian and Compassionate (H&C) application)** u soo gudbisatid Wasaaradda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Kanada (Citizenship and Immigration Canada), aadna weyddiisato in laguu oggolaado inaad sii joogtid Kanada. Si u codsigani u guulaysto, waa inaad muujisaa inaad si fican u saldhigatay Kanada oo ay dhib kugu noqon doonoto inaad adigu dib ugu laabato dalkaagii hooyo. Markay go'aaminyaan codsigaaga H&C, saraakiisha socdaalka waa in ay meesha ku daraan danaha ugu fican ee ilmahaaga.

Saraakiisha socdaalku awood ayey u leeyihiin, si kastaba, inay masaafuriyaan qof codsigiisa H&C aan weli la go'aamin – oo kadibna go'aansada inay aqbalaan codsiga markuu qofku ka baxo baxo Kanada oo dal diba ah u joogo.

Xaalado tiradoodu yar tahay, ayaa laga yaabaa in aad awooddid in aad qaadid tallaabooyin dheeraad ah oo aad ku daahiso ama aad ku joojiso masaafurinta:

- Marka codsigaaga H&C la gudbiyo, waxaad awoodi kartaa in aad kireysato qareen kuu weydiya Maxkamadda Federaalku inay daahiso masaafurintaada ilaa inta la go'aaminayo codsigaaga H&C.
- Haddii aad ka cabsanayso inaad ku noqoto dalkaaga hooyo, waxa kale oo aad qareen socdaalka kala hadli kartaa arrimaha ku saabsan surtagalnimada codsi qaxootinimo, ama codsi kale oo loo yaqaan **Qiimaynta Halista Waddan ka Saaridda ka hor**.
- Waxa kale oo aad la hadli kartaa qareen socdaalka si aad u ogaato haddii ay jiraan fursado kale oo aad heli kartid, sida kafaala qaadashada qoyska.

**Dmitri iyo Jenna  
xiriirkoodu  
wuu xun yahay.  
Labadooduba  
waxay rabaan  
inay mid walba  
gooni u haysto  
gabadhooda  
Marika.**

Dmitri ayaa ku hanjabay inuu Marika dib ugula laabanayo dalkisii hooyo.

Kuma haysto sharci joogitaan Kanada. Wuxuu gudbiyay codsi H&C, laakiin wuxuu halis u yahay masaafurin.

Garsoorihi wuxuu Dmitri u xukumay inuu keligii hayssto ilmaha, iyada oo Jenna marin loo siiyey Sabtida iyo Axadda.

## **Arrimaha sharci ee lala leeyahay waalidka kale**

**Waxaan ka baqayaa inuu  
waalidka kale kala tago  
Kanada ilmahayga oo ula  
guuro dalkoodii hooyo. Ma  
jirtaa hab lagu joojiyo taas?**

Mar haddii u waalid kala tago dalka ilmo, aad ayay u adag tahay in ilmaha lagu soo celiyo Kanada. Wuxuu fican in laga joojiyo ilmaha in lagala tago Kanada. Waa kuwan farsamooyinka qaarkood:

- Waxaad maxkamadda weyddiisan kartaa amar waddan ka saarid la'aan ah ee ilmaha. Amarkaas ayaa dhahaya inaanu ilmahaasi ka bixi karin Kanada bilaa amar maxkamadeed ama oggolaansho qoran oo aad adigu dhiibto. Markuu qof kala gudbo xuduudka ilmo, saraakiisha socdaalka ayaa guud ahaan weydiista inay arkaan amarka ama warqadda maxkamadeed kahor intayna u oggolaan qofku inuu kala tago Kanada ilmaha.

- Waxaad weyddiisan kartaa maxkamadda amar adiga ama maxkamadda idiiin oggolaanaya inaad haysaan baasaboorka ilmaha. Mararka qaarkood maxkamadda ayaa sidoo kale hayn karta baasaboorka waalidka kale.
  - Adigu waad diidi kartaa inaad saxiixdo codsiga baasaboorka ilmahaaga. Si aad ugu hesho ilmaha baasaboorka Kanada, labada waalid waa inay saxiixaan codsiga baasaboorka.

Haddii aad leedahay haynta ilmaha ee sharciga ah, oo waalidka kale ka saaro ilmahaaga dalka amar maxkamadeed la'aan ama ogolaanshahaaga (waliba loo yaqaan "afduubka ilmaha ee waalidka"), waa inaad:

- la xiriirtaa qareen ku siiya talo iyo/ama
  - la xiriirto Unugga la Talinta Carruurta Baylahsan (Vulnerable Children's Consular Unit), kaasoo ah qayb ka mid ah Wasaaradda Arrimaha Dibadda, Ganacsiga iyo Horumarinta Kanada si ay talo iyo caawin kuu siiyan . Waxaad ka wici kartaa lambarka 1-800-387-3124 ama ka heli doonta macluumaad dheeraad ah khadka internetka [travel.gc.ca/child](http://travel.gc.ca/child).

Si loo xaqiijiyo in Dmitri  
aanu ikhtiyaarkiis ugala  
bixin dalka Marika,  
garsooraha ayaa laga  
yaabaa inuu bixiyo  
amar waddan ka saarid  
la'aan ah oo dhahaya  
Marika lagama saari  
karo Kanada.

Haddii saraakiisha  
socdaalku u sheegaan  
Dmitri in mar dhow  
la masaafurin doono,  
Dmitri wuxuu mooshin  
degdeg ah u keeni karaa  
garsooraha qoyska,  
isaga oo weyddiisanaya  
in la joojiyo amarka  
waddan ka saarid  
la'aanta. Dmitri wuxuu  
sidoon kale weydiisan  
kara garsooraha inuu si  
gaar ah uu u sheego in  
mooshinka degdeggaa ah  
lagu deeqi doono in ay  
jirto xaaland isbeddello  
waawayn, oo lama filaan  
ah mooye.

## **Garsooraha ayaa bixiyay amar Waddan ka saarid la'aan ah oo sheegaya inaanu ilmahaygu ka tagi karin Kanada in aan helo amar maxkamad ama oggolaansho waalidka kale helo mooyaane. Maxaa dhacaya haddii aniga la i masaafuriyo?**

In aad kaxaysan karto ilmahaaga iyo in kale waxay qayb ahaan ku xiran tahay inaad haysato haysashada ilmaha iyo in kale. Xaaladaha qaarkood, garsooraha maxkamadda qoyska ayaa siin doona hal waalid kalidiis haynta ilmaha, haddii ay labada waalidba joogaan Kanada iyo haddii kaleba. Xaalado kale, garsooruhu wuxuu sameynayaa laba amar oo hayn iyo marin u helid ilmaha ah: mid wuxuu ku dabbaqmayaa muddada wakhtiga ay labada waalidba ku nool yihiin Kanada, kan kalena wuxuu dabbaqmayaa haddii hal waalid la masaafuriyo.

## **Maxaan sameyn karaa si aan u kaxaysto ilmahayga?**

Xaaladdaada	Waxaad sameyn karto
Garsooruhu wuxuu amar ku bixinayaa waddan ka saarid la'aan, waadna ogtahay in lagu masaafurin doono	Waxaad keeni kartaa mooshin degdeg ah maxkamadda qoyska, adigoo weyddiisanaya in la buriyo amrkii waddan ka saarid la'aanta ilmahaaga. Waxa kale oo aad weydiisan kartaa garsooruhu inuu kuu oggolaado mooshin degdeggaa ah ee hirgalii doona in ay jirto isbeddel la taaban karo, oo aan la fileynin oo xaaladdaada ku yimaada mooyaane.
Adiga oo ilmaha sharci ku haysta	Maxkamadda qoysku way ku caawin doonta si loo xaqijijyo inaad kaxaysan karto ilmahaaga markaad ka tagayso Kanada.
Waxaad haysataa sharciga ilmo hayashada, laakiin waxaa kugu soo wajahan masaafurin, amarkii waddan ilmo ka saarid la'aantunu wuu jiraa	Qareen socdaal sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah ula hadal.

**Markaan aniga iyo xaaskeyga is guursanay, waxaan sameynay heshiis dhahaya haddii aan kala tagno, aniga ayaa waayaya sharci haynta carruurteenna. Hadda waan kala tagaynaa. Taas micnaheedu miyaa inaan lahayn wax fursad ah oo aan ku helo hayn ama marin u helid?**

Maya. *Xeerka Sahrcig Qoyska* Ontario ayaa dhahaya markay laba qof isguursadaan, horey uguma heshiin karaan, qofka helaya haynta ama marin u helka ilmaha hadday hadhow kala tagaan. Qaybta heshiiskiina ee dejinaysa haynta ama marinka u helka ilmaha lama meel marin karayo.

**Micno miyay leedahay haddii aan heshiiska ku galnay Kanada ama dalkayagii hooyo?**

Maya. Macno ma leh haddii heshiiska lagu galay Kanada ama dal kale. Maxkamadda ayaa gaari doonta go'aan ku salaysan danaha ugu fiican ee ilmaha.

# Xusuus

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---